# Dawladda oo soo rogaysa tillaabooyin adag oo heer qaran ah

Si looga hortago in cudurku ku faafo meelaha uu ku yar yahay ee dalka ayay dawladdu soo rogaysaa tillaabooyin intii hore ka adag oo heer qaran ah, taas oo timid kaddib markii ay sidaas ku taliyeen Agaasinka caafimaadka iyo FHI. Waxay tillaabooyinku dhaqangelayaan saqda dhexe khamiista 25-ka maarso, waxayna soconayaan ilaa iyo amar danbe. 12-ka abriil ka hor ayaa mar kale dib loo eegi doonaa.

– Faafidda cudurka ayaa faraha ka sii baxaysa. Waxaan had iyo jeer aragnaa cudurki oo ka dillaacay meelo badan oo dalka ah. Isbataalladiina waxaa khasab ku noqotay in ay baajiyaan daaweyn horey loo sii qorsheeyay si ay boos ugu helaan bukaanka qaba covid-19, degmooyin badanna hawlihii raadraaca cudurka ayaa ku batay. Meelo badan oo dalkoo idil ah ayuu cudurku ka dillaacayaa, xaaladduna waa mid aan kala caddayn, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- daryeelka.

Fasaxa booskaha [iistarka] ayaa sare u qaadaya halista loogu jiro in cudurku faafo maxaa yeelay dad badan ayaa safraya oo arki doona dad ka badan intii ay arki jireen.

- Tillaabooyinka heerka qaran ee cusub dalka oo idil ayay khuseeyaan. Meelaha uu cudurku ku yar yahay ayaa hor iyo horraanba tillaabooyinka looga arki doonaa kuwo adag. Meelaha uu cudurku ku badan yahay – sida Oslo, Viken, Salten iyo Haugalandet – ayey haddeerba ka jiraan tillaabooyin aad u adag, ayuu yiri Høie.

– Fayraska noocyadiisa cusub ee aadka loo kala qaadi og yahay ayaan hadda ku aragnaa meelo aanba cudurku ka jirin. Waxaan aragnaa hal qof in uu keeni karo

in cudurku dillaaco oo degdeg u fido, ayadoo noocyada fayraska ee la kala qaadi og yahay aad loogu xanuunsado islamarkaana ay adag tahay in la joojiyo. Sidaas ayay arkeen degmooyinka hadda in muddo ah isku dayayay in ay fayraska kaga adkaadaan tillaabooyin adag. Waa in laga hortagaa in ay meelo badan oo dalka ah xaalad sidaas oo kale ah ka dhacdo booskaha kaddib. Sidaas darteed ayay hadda lagama maarmaan u tahay in la soo rogo tillaabooyin heer qaran ah oo intii hore ka adag, ayuu Høie hoosta ka xarriiqay.

## 500 oo milyan oo karoon oo la siinayo shirkadaha dhibku soo gaaray

- Waxaan og nahay in ay tillaabooyinku dhaawici doonaan goobaha shaqada, khaas ahaan hoteellada- iyo makhaayadaha. Sidaas darteed dawladdu miisaaniyadda dalka ee wax-ka-beddelka lagu sameeyay waxay nidaamka degmooyinka ee haddaba jira ku kordhin doontaa 500 oo milyan oo karoon kuwaas oo lagu kabi doono shirkadaha dhibku soo gaaray. Lacagtaas oo dheeri ku ah 750-ka milyan ee karoon ee haddaba nidaamka u yaalla.

## Tillaabooyinka heerka qaran ee cusub

### Talooyin cusub

- Halkii mitir hadda wuxuu noqday laba mitir. Dadki aad hadda ka hor ka fogaan jirtay ugu yaraan hal mitir, hadda waxaad ka fogaanaysaa ugu yaraan laba mitir.
- Waxaan ku talinaynaa in ay booqashadu noqoto ugu badnaan laba qof.
- Haddii aad ka timid meel cudurku ku badan yahay looma baahna in aad u baxdo booqasho aad soo cawa-baryayso, adigana ma aha in cawa-bari laguugu yimaado. Dadka keligood nool, carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sano waxaa loo oggol yahay in ay u soo cawa-baryaan mid ama laba saaxiib oo joogto ah.
- Waa in aad yareeysaa xiriirka dadka.
- Waxaan ku talinaynaaa in gafuur-xir la xirto meel kasta oo aan dadka laga fogaan karin masaafo laba mitir ah.

- Waxaan dadka kula talinaynaa in ay ka adeegtaan suuqyada iyo dukaammada waaweyn ee degmadooda.
- Waxaan ku talinaynaa in dib loo dhigo safarrada aan lagama maarmaanka ahayn oo idil, marka laga reebo:
    - Safarrada shaqada lagu tegayo marka aysan suurtagal ahayn in guriga lagu shaqeeyo.
    - Safarrada ay qoyskooda ugu tagayaan ardayda wax ka barta meelo aan qoys u joogin.
    - Safarka ay guri-fasaxeedka ku tegayaan dadka isku guri deggan.
- Waxaa horay loo go'aamiyay in ay waxbarashada jaamacadaha, machadyada iyo dugsiyada farsamadu hab dhigitaal ah ku bixi doonto laga billaabo 6-da abriil. Muddadaas hadda waa la soo hor mariyey oo waxaa laga dhigay 25-ka maarso.

## Xeer-hoosaadyada cusub ee heerka qaran

- Dalka oo dhan ayaa laga mamnuucayaa in khamriga lagu iibiyo baararka iyo makhaayadaha.
- Waa mamnuuc isboortiga- iyo firfircoonida wakhtiga firaaqada la yahay ee abaabulan ee gudaha ka dhaca looguna talo galay dadka waaweyn, marka laga reebo ciyaartoyda ciyaartu xirfad u tahay.
- Goobaha jimicsigu waxay u furnaan karaan keliya dadka degmada ku nool. Dad ka yimid meel degmada ka baxsan waxaa loo oggolaan karaa haddii ay u imaanayaan baxnaano, tababbar gaar ah ama daaweyn.
- Hoolasha dabbaasha waa la xirayaa, laakiin waa loo furi karaa carruurta dabbaasha baranaysa iyo dadka baxnaanada ugu baahan waaskada biyaha.
- Jirdiinooyinka dalxiiska [Fornøyelsesparker], hoolashaha biingaha iyo goobaha madaddaallada ee la midka ah waa la xirayaa.

- Shaqa-bixiyayaashu waa in ay hubiyaan in ay shaqaaluhu guriga ku shaqayn karaan dhammaan goobaha shaqada ee ay taasi suurtagalka ka tahay.
- Dadka Norway ku soo laabta ee ka yimaada safar dibedda ah oo ahaa mid aan lagama maarmaan ahayn waxay muddada karantiilka oo dhan ku qaadanayaan hoteellada karantiilka. Waxay tani dhaqangelaysaa saqda dhexe isniinta 29-ka maarso.
- Waxaan ku talinaynaa in la baajiyo dhammaan qabanqaabooyinka qorshaysnaa. Xeerarka soo socda ayaa la raacayaa, haddii aan qabanqaabada dib loo dhigi karin:

Qabanqaabooyinka gudaha ka dhaca waxaa la oggol yahay 20 qof oo leh meel joogto ah oo ay fadhiistaan oo loo tilmaamay.

Qabanqaabooyinka isboortiga ee gudaha ka dhaca ee dadka ka yar 20 sano waxaa la oggol yahay 50 qof oo ka tirsan naadi isku degmo ah.

Qabanqaabooyinka dibedda ka dhaca waxaa la oggol yahay 50 qof oo keliya.

Aaska waxaa la oggol yahay 50 qof marka qofku fadhiisanayo meel joogto ah oo loo tilmaamay.

## Tillaabooyin adag ayaa weli ka jira gobollada iyo deegaannada hoose

70 degmo ayay dawladdu ku soo rogtay tillaabooyinka heerka ugu adag (tillaabooyinka heerka A).

– Meelaha ku jirey tillaabooyinka aadka u adag ee heer deegaan hoose iyo heer gobol ba, weli sidii ayay ugu sii jirayaan, ayuu yiri Høie.

### Talooyinka booskaha 2021

#### Xiriirka dadka

- Dadka kale laba mitir u jirso marka laga reebo kuwa aad isku guriga tihiin (ama dadka u dhow kuwa keligood deggan). (waa qodob cusub)
- Gafuur-xir xiro marka aadan dadka ka fogaan karin. (waa qodob cusub)
- Waxaan ku talinaynaa in aysan ku soo booqan wax laba qof ka badan. Weliba dadka aad la xiriirayso isla kuwii ha ahaadeen. (waa qodob cusub)
- Waa in dib loo dhigaa dhammaan qabanqaabooyinka aysan qabashadoodu ahayn mid aan laga maarmi karin. (waa qodob cusub)
- Waa in aad yaraysaa dadka aad la kulmayso. (waa qodob cusub)

## Adeegga

- Waxaan dadka kula talinaynaa in ay ka adeegtaan suuqyada iyo dukaammada waaweyn ee degmadooda

## Safarrada

- Waxaa lagu talinayaa in aan dibedda loo safrin.
- Ha u bixin safarrada gudaha ah ee aan lagama maarmaanka ahayn.
- Guri-fasaxeedka ama hoteellada dalka waa la aadi karaa, laakiin gaadiidka dadweynaha ha raacin haddii ay suurtagal tahay.
- Dadka u safra degmooyin ay ka jiraan tillaabooyin ka dabacsan kuwa degmadoodii waxay sida guud raacayaan talooyinka ka jira degmada ay ku nool yihiin.

## Goobaha shaqada

- Cid kasta oo awoodda guriga ha ku shaqayso.
- Shaqa-bixiyuhu waa in uu hubiyaa in ay shaqaaluhu guriga ku shaqayn karaan dhammaan goobaha shaqada ee ay taasi suurtagalka ka tahay. (qodob cusub)

## Isboortiga- iyo firfircoonida wakhtiga firaaqada la yahay

- Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sano si caadi ah ayay u tababbaran karaan oo uga qaybqaadan karaan firfircoonida wakhtiga firaaqada la

yahay. Ayaga waa laga dhaafayaa in ay hal mitir isu jirsadaan marka ay taasi lagama maarmaanka u tahay firfircoonida la qabanayo.

- Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sano way ka qaybqaadan karaan qabanqaabooyinka isboortiga ee ay ku kulmaan dadka isku degmada ah. Qabanqaabooyinka noocaan ah waxaa joogi kara ilaa iyo 50 qof haddii ay gudaha ka dhacaan. Haddii ay dibedda ka dhacayaanna 50, oo ay ku jiraan ciyaartoyda, tababbarayaasha, garsoorayaasha iyo daawadayaasha. Carruurta iyo dhallinyaradu haddii ay la ciyaaraan naadi degmo kale, tartanka way kala qaybgeli karaan naadigaas haddii ay xaaladda kala qaadista cudurradu taas oggolaanayso.
- Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sano ee ciyaara isboorti aan lays taabanayn sida shiiga, way ka qaybqaadan karaan qabanqaabooyinka isboortiga ee dibedda ka dhaca ayna ku kulmaan dadka isku naadiga guud ama isku gobolka ah – halkaas oo gobol loola jeedo gobol juqraafi.
- Dadka waaweyn dibedda way ku samayn karaan tababbar abaabulan haddii la kala fogaan karo.
- Ciyaartoyda ay ciyaaruhu xirfad u yihiin sidii caadiga ahayd ayay ugu tababbaran karaan gudaha iyo dibedda labadaba.
- Isboortiga heerarka sare ee ciyaaraha waa la oggol yahay, marka laga reebo ciyaaraha horyaalka heerka koowaad oo weli lagu talinayo in dib loo dhigo. Waxaa taas la mid ah ciyaaraha lala ciyaarayo koox aan ka mid ahayn naadigaaga guud. Waxay tani sidoo kale khuseysaa ciyaaraha aan lagu jirin xilligii la ciyaari jirey, sida kubbadda cagta. Waxaa weli lagu talinayaa in la yareeyo dhaqdhaqaaqa iyo is aragga bulshada.

## Waxbarashada sare

- Ardayda waa laga xirayaa golayaasha jaamacadaha, machadyada iyo dugsiyada farsamada, waxbarashaduna waxay ku baxaysaa hab dhigitaal ah. Maktabadaha iyo hoolasha wax akhrisku way furnaan karaan. (waa qodob cusub).
- Goobaha waxbarashadu ardayda waa u furi karaan golayaasha haddii aysan ardaydu kuwaas uga maarmin tijaabooyin ama tababbar aan si

dhigitaal ah loo qaadan karin, islamarkaana ay muhiim u yihiin si waxbarashada loo sii wato. (waa qodob cusub)

## Xeerar dalkoo idil khuseeya

### Isboortiga- iyo firfircoonida wakhtiga firaaqada la yahay

- Waa mamnuuc isboortiga- iyo firfircoonida wakhtiga firaaqada la yahay ee abaabulan ee gudaha ka dhaca looguna talo galay dadka waaweyn, marka laga reebo ciyaartoyda ciyaartu xirfad u tahay. (waa qodob cusub)

- Goobaha jimicsigu waxay u furnaan karaan keliya dadka degmada ku nool. Dad ka yimid meel degmada ka baxsan waxaa loo oggolaan karaa haddii ay u imaanayaan baxnaano, tababbar gaar ah ama daaweyn.
- Hoolasha dabbaasha waa la xirayaa, laakiin waa loo furi karaa carruurta dabbaasha baranaysa iyo dadka baxnaanada ugu baahan waaskada biyaha.
- Waa la xirayaa goobaha madaddaallada sida jirdiinooyinka dalxiiska iyo hoolashaha biingaha. (waa qodob cusub)

### Safarrada

- Dadka ka soo laabtay safarrada dibedda ah ee aan lagama maarmaanka ahayn, waa in ay muddada karantiilka oo dhan ku qaataan hoteellada karantiilka (waa qodob cusub oo dhaqangelaya saqda dhexe isniinta 29-ka maarso).

### Isu imaatinnada iyo qabanqaabooyinka gaarka ah:

Gudaha: 20 qof oo leh meelo joogto ah oo ay fadhiistaan loona tilmaamay (100 ayaa laga soo yareeyay)

Gudaha: Aaska 50 qof oo leh meelo joogto ah oo ay fadhiistaan loona tilmaamay (100 ayaa laga soo yareeyay)

Gudaha: 50 qof qabanqaabooyinka isboortiga ee loogu talo galay dadka kar 20

sano ee ka wada tirsan naadi guud oo isku degmo ah.

Dibedda: Qabanqaabooyinka 50 qof (laga soo yareeyay 200 ama 600 haddii ay jiraan meelo joogto ah oo la fadhiisto loona tilmaamay)

## Caweysyada, makhaayadaha iyo qabanqaabooyinka haysta shatiga khamriga

- Iibinta khamriga waa laga mamnuucayaa. (waa qodob cusub)